

Waa maxay Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ee COVID-19?

Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ee COVID 19 waxa uu siiyaa gargaar ka bixinta lacaga guryaha ah dadka si uu u caawiyo ka hortagga guryo ka saarida, hoy la'aanta iyo si ay u helaan xasilooni dhanka deegaanka ah kireystayaasha iyo mulkiilayaasha guryaha ee xaqqa u leh. Maamulayaal ka socda deegaanka ayaa dib u eega codsiyada shakhsiyaadka iyo qoysaska codsanaya gargaarka si ay u xaqiijiyaan xaq u yeeladka ayna u dhameeyaan hawsha bixinta kharashaadka xaqqa u leh in la bixiyo iyagoo matalaya qoysaska.

Barnaamijka Caawinta Guriyeynta ee COVID-19 mar dambe ma awoodo inuu aqbalu arjiyada. Fadlan isu diiwaangeli liistadayada [eNews](#) haddii aad rabto inaad hesho wixii ka soo cusboonaada barnaamijka. Ilaaha kale ee guriyeynta, [booqo boggan websaydka](#) oo guji qaybta "Resources for Renters and Homeowners" ("Kheyraadka kireystayaasha iyo mulkiilayaasha guryaha").

Waan soo diray arjigaygii. Maxaa dhacaya marka ku xiga?**Arjiyada khadka internetka ah**

- Haddii aad ku soo gudbisay arjigaaga kaalmada guriyeynta nidaamka internetka oo ay xaaladiisu ahayd "Xaqiijin" ama "La Gudbiyey" ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee Diseembar 7, maamule aagaaga ah ayaa dib u eegi doona.
- Haddii xaaladda arjigaagu ku jiro nidaamka internetku uu ku jiray xaalad "In Progress" ("socota") ka hor taariikhda kama dambaysta ee Diseembar 7, waa laga noqday lamana qaban doono.
- Waad eegi kartaa xaaladda arjigaaga caawimada adiga oo [galaya akoonkaaga internetka](#) oo dib u eegaya xaalada ku garab liistaysan codsiyada gargaarka. Waxaad ka heli kartaa [caawimaad dheeraad ah halkan](#) ama la xiriiir khadka Caawinta ee HousingLink 877.314.1401.

Codsiyada Waraaqaha ah

- Haddii arjigaaga warqada ah boostadu qabatay ugu dambayn Diseembar 7, oo aad ku soo dartay nuqulada biilasha waqtigii la bixin lahaa la soo dhaafay iyo xaqiijinta dakhliga, maamule aagaaga ah ayaa soo gelinaya arjigaaga nidaamka khadka internetka si loo borosiisgareeyo.

Baahida loo qabo oo aad u sarraysa darteed, waxay qaadan kartaa dhowr toddobaad ama ka badan laga bilaabo wakhtiga la soo gudbiyo arjiga ilaa inta maamulka aaggaaga ah uu kula soo xiriirayo si uu howsha u sii wado.

Muddada wakhtiga ay qaadanayso in lagu borosiisgareeyo arjigaagu wuu kala duwanaan doonaa waxaana ku jiri doona arrimaha sida in aad u baahan tahay in lagaa caawiyo dukumiintiyada, dhammaystirka dukumiintiyada, iyo tirada arjiyada uu maaraynayo maamulaha aagaagu.

Fadlan soo uruuri dukumiintiyada soo socda hadda si aad diyaar ugu noqoto marka uu kula soo xiriiro maamulaha deegaankaaga ah:

- Dakhligaagii afartii asbuuc ee la soo dhaafay ama waxaad iskaa u caddayn kartaa dakhligaaga
- Biilkii wakhtigii la bixin lahaa la dhaafay ama ogeysiiska aad dooneyso in lagaa caawiyo

- Magaca, lambarka taleefanka iyo cinwaanka emailka qofka ama ganacsiga lacagta la siin doono haddii la ogolaado

Waad ogeysiin kartaa milkiilaha gurigaaga ama adeegaha amaahda guryaha inay u baahan doonaan inay soo buuxiyaan foomka W-9 haddii arjigaaga la ogolaado. Foomamka W-9 loogama baahna shirkadaha adeegyada. Lacag bixinta kaalmada guriyeynta lama bixin karo ilaa mulkiilahaaga ama adeegaha amaahda gurigu uu foomka W-9 si toos ah u siiyo maamulka aagaaga.

Waxaa la ii diiday kaalmada guryaha ee COVID-19. Ma jiraa nidaam rafcaan ah?

Haa. [Fadlan ka eeg xeerka racfaanka](#) wixii macluumaad dheeraad ah.

Muxuu Barnaamijka Caawinta Guriyeynta ee COVID-19 u joojiyay aqbalida arjiyada wixii ka dambeeya Diseembar 7?

Barnaamijka Gargaarka ee COVID-19 waxaa lagu maalgeliyey doolaro ka yimid federaalka iyada oo loo sii marinayo Sanduuqa Coronavirus Relief Fund, kaas oo ay oggolaatay Xeerka Coronavirus Aid, Relief, and Economic Security (CARES) oo maalgalintani waxay dhamaanaysaa Diseembar 31, 2020. Maamulayaasha aagga ayaa waxay u baahan yihiin inta ka hartay Diseembar si ay dib ugu eegaan oo ay u borosiisgareeyaan arjiyada ugu badan ee suurtoogalka ah.

Uma qalmo barnaamijkan, laakiin weli waxaan u baahanahay caawimaad bixinta kirada ama deynta guriga. Xagee ayaan caawimaad ka raadsan karaa?

Booqo [Kheyraadka loogu talagalay kireystayaasha iyo milkiilayaasha guryaha ee boggayaga COVID-19](#) si aad u hesho liistada ilaha/khayraadka kale.